



Xeerka

2.30.010-P

Diinta iyo Dhaqanka Dhowrista

Waxaan ixtiraamnaa oo illaalinaa xuquuqaha dastuurka ee ardaydeena, qoysaska, iyo shaqaalaha si ay ugu dhaqmaan oo ay u dhowraan diintooda ama aysan ugu dhaqmin wax diin ah gabi ahaanba. Waxaan sidoo kale ixtiraamnaa oo illaalinaa ardaydeena, qoysaska, iyo shaqaalaha' dhowrista dhaqanka qaniga ah oo kala duwan. Marwalba, waxaan raadinaa inaan isku dheellitirno xuquuqahaas gaarka ah ee muhiimka ah iyo shuruudaha dastuuriga ah ee ah in PPS, sida dugsiga degmada dadweynaha, ayaa laga yaabaa inaysan u janjeerin ama sare u qaadin diin gaar ah oo mid kale. Iyo Mar walba, waxaan ku dhiirogelinaa dhammaan ardayda, qoysaska, iyo shaqaalaha inay muujiyaan ixtiraam, dulqaad, oo xiisaha ku saabsan dhaqamada diinta iyo dhaqanka ee ka duwan midkooda. Kala duwanaanshahaan iyo aqbalaadeena iyaga ayaa ka dhigo bulshada dugsigeena bulsho loo dhan yahay oo soo dhaweyn leh oo dhammaan ardayda ay si dhab ah ugu hormari karaan.

Maqnaanshaha laga Cudur daartay iyo Hoyga Kale

Ardayda iyo qoysaska waxay codsan karaan qaabilaad u suurtoogelineyso inay dhowraan dhaqamada diintooda iyo dhaqanka. Qaabilaadahaas waxaa ka mid noqon kara maqnaanshaha laga cudur daartay oo waxbarasho diimeedka ama gudashada fasaxa. Codsiyada maqnaanshaha ama qaabilaadaha kale waa inay ahaadaan qoraal ahaan ka imaaneyso waalidka/masuulka ardayga oo loo diro macalinka iyo/ama maamulaha dugsiga ardayga.

Fasalada. Ardayda ayaa laga yaabaa in looga dhaafo fasalada diintooda ama dhaqankooda gaarka ah iyadoon jirin ciqaab. Ardayda seegay shaqo ama qiimeyn waa in la siiyaa fursad macquul ah oo lagu sameeyo imtixaankaas ama qiimeyntaas. Fursadaha dib u sameynta loogama baahanayo ardayga maalinta dugsiga isla markaaba kadib markii ardayga uu ka maqnaado dugsiga si uu u guto fasax diimeedka ama dhaqameedka.

Howlaha Manhaj wadaaga iyo Waxbarashada dhaafsan. Ardayda ayaa laga yaabaa in looga dhaafo howlaha manhaj wadaaga iyo waxbarashada dhaafsan diintooda ama dhaqankooda gaarka ah iyadoon jirin ciqaab.



Xeerka

2.30.010-P

Diinta iyo Dhaqanka Dhowrista

Aqoonsashada Fasaxyo Diimeedka Weyn iyo Gudashada Dhaqameedka

Sida qeyb ka ah abuurista kalandarka sannadlaha dugsiga iyo nidaamka la qabsashada, Kormeeraha guud ayaa aqoonsanayo fasaxyo diimeedka weyn iyo dhaqanka ee bulshadeena.

isticmaalida qaababka sharci ahaan la aqbali karo ee sidaas lagu sameeyo. Degmada iyo mid walboo dugsigooda ah waa inay ka fogaadaan jadwaleynta munaasabadaha fasalka-, dugsiga- ama degmadoo dhan (tusaale ahaan, habeenada Dugsi ku Laabashada, shirarka dugsigoo dhan, shirarka waalidka-macalimiinta, kulamada Guddiga Dugsiga) ee taariiqahaas ah. Munaasabado noocaas ah waxaa loo jadwaleyn karaa fasaxyo diimeedka ugu weyn kaliya haddii jadwaleyn noocaasi ay si macquul ah muhiim ugu tahay sameynta shaqeyn ku haboon ee barnaamijka dugsiga, koorsada waxbarashada, ama si looga fogaado culeyska aan macquulka aheyn ee ku saabsan ardayda kale; ama haddii jadwaleyn noocaas ah ay ka baxsantahay xakameynta shaqaalaha Degmada. Shaqaalaha waxay ogeysiinayaan qorshooyinka ardayda iyo waaladiinta sida ugu dhaqsiiha badan ee suurtoogalka ah si markaas qilaafaadka gudashada diimeedka ama dhaqanka looga fogaan karo haddii ay suurtoogal tahay ama haddii kale la qaabilo haddii aysan aheyn.

Munaasabadaha Aan Degmada Kafaalo qaadin

Markii munaasabadaha dugsiga ama Degmada la jadwaleeyo oo ay maamulaan ururo aan aheyn Degmada (*tusaale ahaan*, OSAA, Outdoor School, ururada imtixaanada qaranka), Degmada waa inay u doodaa ururadaas oo in dhacdooyin noocaas ah aan lagu qaban fasaxyo diimeedka weyn ama dhaqanka.

La qaatay 1/2024